



Unikum ayaa beddelaya Hjärntorget

Laga bilaabo xilli dugsiyeedka deyrta bilowgiisa, asbuuca 32 iyo wixii ka danbeeya, wuxuu dugsiiga xannaanadu isticmaalayaa Unikum beddelkii Hjärntorget. Unikum waxaad si sahlan kala socon kartaa oo ka qayb qaadan kartaa waxyaalaha ilmahaagu sameeyaan caadiyan iyo horumarkooda. Waxaad halkaas ka helaysaa warbixin muhiim ah oo ka socota dugsiiga xannaanada.

Gal Unikum

Adiga waalidka ah (mas' uulka ah) waxaad geli kartaa Unikum laga bilaabo asbuuca 32. Kala soo deg app-ka Unikum familj App Store ama Google Play ama ka gal unikum.net. Waxaad ku gelaysaa BankID.



Hjärntorget waxaa la xirayaa 30 juun (30 bisha 6aa)

Hjärntorget waxaa la xirayaa 30 juun adiga waalidka ahna ma geli kartid wixii markaas ka danbeeya. Hjärntorget waxaa ku jiri kara sawirro ama wax laga qoray ilmahaaga. Haddii aad rabtid inaad wax keydsatid waa khasab inaad samaysid ka hor 30 juun. [Halkaan ayaad ka akhrin kartaa sidaan sawirrada u keydsanaysid iyo wixii lagu qoray Hjärntorget.](#)

Waxaad sidoo kale tilmaamaha ka helaysaa goteborg.se/forskola meeshay ku qoran tahay Hjärntorget hoosteeda.

Dhammaan dukumentiyada ku jira Hjärntorget waa xog dan guud waxaana loo keydinayaa sida uu dhigayo sharciga keydinta xogta hore waxaana lagu keydiyaa qaab kombuyuutar la gelinayo.

Maxaan u beddelaynaa Hjärntorget?

Unikum waxaa loogu talo galay hawlaha dugsiiga xannaanada iyo baahidiisa. Istimalkiisu wuu uga fudud yahay kii hore waalidiinta iyo shaqaalaha wuxuuna

fursad tii hore ka fiican u siinayaa dhanka wada xiriirka, la socoshada iyo ka qayb qaadashada.

Ma qabtaa su'aalo?

Waxaad warbixin intaa dheer oo ku saabsan Unikum ka heli doontaa dugsiga xannaanada ilmahaagu dhigto. Waxaad wixii intaa dheer kasii akhrin kartaa goteborg.se/forskola.

Haddii aad qabtid su'aalo kale waxaan kugu soo dhawaynanaa inaad la xiriirtid shaqaalaha dugsiga xannaanada.